



waxaa idiinku ikhyaarsan kuwa idiinku akhlaaq fiican

Cabdullaahi Binu Camar Allah ka raali ahaado isaga iyo aabihiibee wuxuu yiri: Nabigu scw ma ahayn mid af xun oo ma xishoode ah, wuxuuna dhihi jiray: " waxaa idiinku ikhyaarsan kuwa idiinku akhlaaq fiican."

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Kama mid ahayn Nabiga scw akhlaaqdiisa hadalka xun iyo ficilka xuni, mana ahayn mid u qasda xumaanta ama ula kac u sameeya xumaan, Nabigu scw wuxuu ahaa mid akhlaaq wayn leh. Nabigu scw wuxuu oran jiray kan Ilaahay xagiisa idiinku fadliga badan waa kan idiinku akhlaaq wanaagsan, sida wanaag bixinta waji furnaanta, dhib la'aanta, u dulqaadashada dadka, iyo dad la dhaqanka wanaagsan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5803>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

